

**Xeer Wasaaradda Maaliyada - 20 Novembar, 1962, lamba. 294,
Go'aaminta socodka sharciga ah ee Shilinka.**

Wasaaradda Maaliyada

Markuu arkay Xeerka-Sharci 6 Maarso 1961, lamba. 2 oo loo beddelay Sharciga 23 Maayo 1961, lamba. 2 oo la xiriiro nidaamka lacagta;

Markuu arkay Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda 5 Maarso 1962, lamba. 86 ee la xiriirto go'aaminta calaamadaha iyo astaamaha shilinka Soomaaliga:

Markuu arkay Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda Maarso 5, 1962, lamba. 87 oo ku saabsan go'aaminta qoondada ugu horreysa ee samaynta lacagta Shilin Soomaaliga;

Markuu arkay qodobka 4-aad ee Xeer-Sharci ee 5tii Juun 1962-kii, n. 2 oo ka kooban xeerar la xiriira sameynta, soo saarista iyo wareegga lacagta warqadaha iyo qadhaadiicda birta marka la eego go'aaminta socod sharciyeedkooda;

Markuu tixgeliyay xaaladda gabogabo ee uu marayo kayd-lacageedka Soomaalida ee weli suuqa ku jira;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in suuqa la soo geliyo iyo in la go'aamiyo taariikhda bilawga socod sharciyeedk tigidhada hore loo soo saaray;

Markuu tixgeliyay fursadda ah in aan hadda loo sameynin, shuruudo xaddidan lacagta waraaqaha Soomaaliyeed, kuwaasoo heysta socod-sharci sugan oo buuxo;

Isago ka duulaayo soo jeedinta Bangiga Qaranka Soomaaliyeed;

Wuxuu Go'amiyay

Qod. 1

Lacagta warqadaha shilin Soomaaliga ah oo qiimaheedu yahay boqol, labaatan; toban iyo shan, kuwaas oo calaamadahooda iyo sifooyinkooda lagu go'aamiyay Xeer Madaxweyne Maarso 5, 1962, lamba. 86 iyo qaybaha wax-soo-saarkooda, oo leh tilmaanta iyo tirooyinka lagu qeexay Xeer Madaxweynaha ee March 5, 1962, lamba. 87 waxay leeyihiin socod-sharci sugan oo buuxo iyo awood si xur ah ay ugu socoto dhulka Jamhuuriyadda laga soo bilaabo 15 Decembar 1962. Sidaa darteed Bankiga Qaranka Soomaaliyeed waxaa loo igmaday in laga bilaabo taariikhdaas uu lacagaha soo daabaco.

Qod. 2

Lacagta warqadaha shilin Soomaaliga ah oo la soo saaray iyadoo la raacayo Xeerarka 18 ee Maajo 1950 lamba. 14 iyo 15 ee kala dambeeyay waxay si ku meel gaar ah u haystaan socod-sharci ah iyo awood buuxda.

Muqdisho, Novembar 20, 1962.

Abdulcadir Mohamed Aden

Arkay oo ku diiwaan gashan - Reg. lamba. 2 - xaashida lamba. 93.

Muqdisho, 28 Novembar, 1962.

Hantidhowraha Guud: **Xasan Dahir**